

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Bilowgii murugada
dadka



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus

Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot; Tammy S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service

email: zemendale@gmail.com

Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children

www.M1914.org

©2013 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Ilaah wuxuu abuuray
waxwalba. Markii
Ilaah abuuray ninkii ugu
horreeyay oo
ahaa Aadan, ...



... waxa ay ninka iyo
naagtiisii Xaawa ahaydba
ku wada noolaayeen
Beer Ceeden.




Waxay ahaayeen kuwo
farxad buuxda haysta oo
addeecaya Ilaah kuna ...



... faraxsan la
joogitaankiisa ilaa lagasoo
gaadhayay maalin ka mida
maalmaha ...






"Ilaah miyuu
idinku yidhi,
Waa inaydnaan
waxba ka cunin
geed kasta oo
beerta ku
yaal?"



Abeesadii
ayaa Xaawa
weydiisay
su'aashan.





Waxay iyana
ku jawaabtay,
"Midhaha
geedaha beerta
waannu cuni
karnaa marka
laga reebo mid."



"Haddii
geedkaas
aannu wax ka
cunno waannu
dhiman
doonnaa."




Abaasadii
ayaa
dabeetana
uugu
jawaabtay,
"Ma dhiman
doontaan."



"Waxa aad
noqon doontaan
sida Ilaah oo
kale." Xaawa
waxay doonatay
geedkii.



Waxa ay
dhegeystay
abeesada oo
midhihiina
waxbay ka
cuntay.



markii Xaawa ay
caasiday Ilaah sidoo
kalena Aadan ayay
ku sababtay
inuu isna
midhaha
wax ka
cuno.



Waxay ahayd Aadan
inuu yidhaahdo,
"Maya! Anigu
ma caasiyi
doono
ereyga
Ilaah."





markii

Aadan iyo Xaawa ay
denbaabeen, labadoodiiba waxay
ogaadeen inay qaawan yihiin.





Waxay
isku toleen caleemo berde,
waxa ay dabeetana isku dayeen
inay iska qariyaan Ilaah.



Markii maalintu qabowday
ayaa Ilaah yimid beerta.
Waxa uu ogsoonaa waxa ay
Aadan iyo Xaawo
sameeyeen. Aadan
wuxuu eedeeyay
Xaawa.



Xaawana waxay eedaysay
Abeesada. Ilaahna wuxuu
yidhi, "Abeesadu way
habaaran tahay.
Naagtuna waxay ilmo
ku dhali doontaa
xanuun."



"Aadanow, maadaama
oo aad denbaabtay,
dhulku wuu
habaabaran yahay oo
waxa kaagasoo bixi
doona godxan
iyo yamaarug.



Waad dhididi
doontaa oo
dhibaatoon
doontaa si
aad wax uugala
soo baxdo."





Ilaah wuxuu Aadan
iyo Xaawa ka saaray
beertii
cajiibka
ahayd.

Waayo waa ay
denbaabeen, waxaana
laga soocay Ilaaha
nolosha
bixiya!





Ilaah wuxuu sameeyay
seef ololaysa si ay
bannaanka usii
ahaadaan.





Ilaah wuxuu Aadan
iyo Xaawa dhar uuga
dhigay hargo. Xaggee
Ilaah haddaba
ka keenay
hargaha?



Markii ay qoska noqdeen ee
ilmo u dhashay Aadan iyo Xaawa,
ilomohoodii ugu horreeyay
wuxuu ahaa

Qaabiil
oo beer
falato ah.



Ilmohoodii labaad oo ahaa Haabiil,
waxa uu isna ahaa adhi jire.



Maalin maalmaha ka mida ayaa
Qaabiil wuxuu Ilaah u bixiyay
xoogaa khudaar ah.



Haabiilna waxa uu Ilaah qurbaan
ahaan uugu bixiyay mid ka mida
adhigiisa kuwa uugu fiican.



Ilaahna wuxuu
ku farxay
hadiyadda
Haabiil.



Ilaah kumuu farxin
hadiyaddii ama qurbaankii
Qaabiil. Dabeeto
Qaabiilna wuu
cadhooday.



Laakiin Ilaah wuxuu isaga ku yidhi, "Haddaad wax wanaagsan samaysid, sow laguma aqbaleen?"



Qaabiil cadhadiisii kama ayna
dhammaanin. Wakhti dabadiisna
waxa uu weeraray
walaalkiis Haabiil
oo waanu
dilay
isaga.



Ilaah wuxuu la hadlay
Qaabiil isagoo ku leh,
"Walaalkaa Haabiil
meeh?"




isna waxa uu ku jawaabay,
"Ma aqaan: ma anigaa ah
walaalkay ilaaliyihiisa?"



Ilaah waxa uu dabeetana isaga ku
ciqaabay in aanu awood u yeelan
doonin inuu dhulka
beerto oo uu noqon
doono mid carcarara.



Qaabiil waxa uu ka
tegay Ilaah.



Waxa uu dabeetana guursaday
gabadhii ay dhaleen Aadan
iyo Xaawa, waxaanay
noqdeen qoys.



Si dhakhso ahna, Qaabiil carruurtuu
awowga u ahaa iyo kuwaasi kuwii
ay sii dhaleeni waxa ay
buuxiyeen



magaaladii la
asaasay.



Sidoo kalena, goyskii Aadan
iyo Xaawa si dhakhso ah
ayay u koreen.



Wakhtigaas isaga ahna
dadku waxa ay noolaan
jeer cimri dheer.



Markii wiilkeedii Seet dhashay,
Xaawo waxay tidhi, "Ilaah
abuur kaluu ii soo dhigay
Haabiil meeshiisii."



Seedna waxa uu ahaa nin xaq ah oo wuxuu noolaa 912 sanadood isagoo carruur bandanna dhalay.



Dunida dhexdeeda,
dadkii waxa ay noqdeen
kuwo marba marka ka
danbaysa sii xumaada
oo facba



faca
kaluu
raacay.



Ugu danbayntii,
Ilaah inuu baabi'iyoo
aadanaha ...



... dugaagga oo dhan iyo
shimbiraha. Ilaah waxa
uu ka caloolxumaaday
inuu abuuray
dadka.



Laakiinse nin qudha
ayaa Ilaah raalli
geliyay ...



Ninkani waxa uu ahaa Nuux.



Waxa uu ahaa farcankii Seet,
oo Nuuxna waxa uu ahaa nin
xaq ah. Waxa uu ahaa
mid ku xidhan
Ilaah.



Sidoo kale saddexdiisii
wiil ee uu dhalay waxa
uu baray inay Ilaah
addeecaan.



Imika haddaba Ilaah
wuxuu qorsheeyay inuu
Nuux u adeegsado si
gaar ah oo
cajiib leh!



Bilowgii murugada dadka

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 3-6

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.



Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay,
sidan ku dheh Ilaah:

Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay
Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato
denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay.
Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si
aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin
maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu
caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo
ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo
maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

